# XAASHIDA XAQIIQADA

## LA TACAALIDDA XADGUDUBKA GALMADA EE SOOMAALIYA

### KA HORTAGGA IYO ILAALINTA





## ARRIMAHA KHATARTA LEH

Laga soo billaabo 2017 ilaa 2023, barakaca ay abaartu keentay, ka ganacsiga ay Al-Shabaab ku sameeyaan haweenka iyo gabdhaha iyo tallaabooyinka la qaaday xilligii COVID-19 ayaa ahaa arrimaha ugu waaweyn ee halista ku ah ilaalinta haweenka.

Si ka sii ballaaran, xaaladda asaaska u ah xadgudubyada galmada ee ka dhaca Soomaaliya ayaa ah dagaallada weli socda, isla xisaabtan la'aanta iyo hanaan sharci oo adag la'aantiis si dadka oo dhan looga ilaaliyo xadgudubyada galmada.

## HAB-DHAQANKA WANAAGSAN

Barnaamijka Qaran ee La Dhaqanka iyo Wax ka Qabashada Dagaalamayaasha Soo Goostay – Wuxuu haweenka ka goostay Al-Shabaab ku taageeraa baaritaanno caafimaad oo gaara, iyo kuwo lagu hubinayo badqabka maskaxda, sidoo kale tababaro waxbarasho iyo kuwo xirfadeed. Ugu yaraan boqolkiiba shan oo ka mid ah 1,327 haween ee lagu taageeray barnaamijkan, waxay sheegeen in si qasab ah loogu guuriyay xubno ka tirsan Al-Shabaab.

Saddex xarumood oo ah kuwa hal meel adeegyada ku bixiya ayaa laga dhisay magaalooyinka ay Baydhabo, Dhuusomareeb iyo Kismaayo si loogu taageero dadka ka badbaaday Tacdiyada la xariira jinsiga, taasoo hoos imanaysa barnaamijka wadajirka ah ee Haweenka, Nabadda iyo Ilaalinta ee ay hormuudka ka tahay Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka ee Dowladda Federaalka ah oo ay taageeraan hay'adaha fulinaya ee Qaramada Midoobay.

Xarunta Baahi-Koob ee hal meel adeegyada ku bixiya ee Hargeysa – ee taageero buuxda siiya dadka ka dhibanayaasha tacdiyada ku saleysan jinsiga iyo galmada iyadoo loo marayo adeegyo dhexe oo takhasus ah oo lacag la'aan looga heli karo hal goob.

## NATIIJOOYINKA MUHIIMKA AH

**DHIBBANAYAASHA XAD-GUDUBYADA GALMADA**

2017 ILAA 2023 (CTFMR) HANAANKA KORMEERKA IYO WARBIXINTA

**2,007** GABDHOOD
**13** WIIL

**DHIBANAYAASHA XAD-GUDUBYADA GALMADA EE LA XIRIIRA COLAADAHA**

2017 ILAA 2023 (MARA)

**129** DUMAR AH
**43** GABDHOOD
**2** WIIL
**1** NIN



Sannadkii 2020 waxa la diiwaangeliyay koror xad sare ah oo xadgudubyada galmada ah, gaar ahaan carruurta (79 boqolkiiba ayaa kordhay marka la barbardhigo 2019 sida ku qoran MRM) kuwaas oo ay ku xad-gudbeen kuwo haya xilal awood leh, ka dib askaraynta qasab ah iyo/ama afduub ay geysteen kooxaha hubaysan.

## HANAAN SHARCI AH OO DADKA DHAMMAAN LAGAGA ILAALIYO XADGUDUBKA GALMADA

### Meey 2018
Qabyo-qoraalka Hindise Sharciyeedka Dambiyada Galmada (SOB) ayaa Golaha Wasiiraddu si aqlabiyad leh u ansixiyay.

### Juun 2018
Qabyo-qoraalka SOB ayaa loo diray Baarlamaanka si ay uga doodaan una ansixiyaan.

### Nof 2019
Wuxuu ka soo horjeedaa qodobka 69aad ee Dastuurka Ku-meel gaarka ah iyo Xeer Hoosaadka Gollaha Shacabka.

Hindise sharciyeedka ayaa Guddoomiyuhu dib ugu soo celiyay Golaha Wasiirada si wax looga bedelo iyadoo aan lagala tashan Guddiyada ay khuseyso.

### Diseembar 2019
**15** xildhibaan ayaa keenay mooshin ku saabsan in sharciga lagu soo celiyo Baarlamaanka si loogu sameeyo akhrinta koowaad si waafaqsan qodobka 69-aad.

### Juun 2020
Xildhibaanadu kuma aanay gulaysan isku deygii ahaa inay xeer cusub* soo bandhigaan, halkii ay ahayd inay ka doodaan SOB-gii Gollaha Wasiiradu hore u ansixiyay.

### Diseembar 2022
Hindise sharciyeedka ayaa loo diray in dib u eegis ku sameeyaan Golaha Culimada Qaranka, sababo la xiriira weerarro dhanka internetka ah oo ay sameeyeen taageerayaal magac sare leh.

### Diseembar 2023
Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka ee Dowladda Federaalka ayaa soo bandhigtey Qabye qoraalka Hindise-Sharciyeedka Dembiyada Kufsiga iyo Anshax-Xumada ee cusub waxaana ansaxiyey golaha wasiirada.

2018 | 2019 | 2020 | 2021 | 2022 | 2023 | 2024

**Soomaaliya waa in ay si degdeg ah u soo saartaa sharci dadka dhammaan ka ilaalinaya xadgudubyada galmada**

*Xeerka Dambiyada La Xiriira Galmada

# TALOOYIN

## KU SAABSAN SIDA LOO XOOJIYO KA HORTAGGA IYO KA ILAALINTA XADGUDUBKA GALMADA

DFS DXF — Talooyin loo soo jeediyay Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka

BC — Talooyinka ku wajahan Beesha Caalamka



### LA DAGAALLANKA CEEBAYNTA IYO TAKOORKA

- **DFS DXF** Samee wacyigelin dadweyne si wax looga qabto arrimaha ceebaynta xadgudubka galmada.
- **BC** Mudnaanta sii wax ka qabashada Xadgudubyada galmada ee la xariira colaadaha iyada oo loo marayo barnaamijyada wax ka qabta warbixin la'aanta iyo xadgudubka dhaqanka.
- **BC** Samee oo hirgeli barnaamijyo la tacaala sababaha asaasiga ah ee keena Xadgudubyada galmada ee la xariira colaadaha, gaar ahaan noocyadii horey u jiray ee takoorka iyo rabshadaha ka dhanka ah haweenka.

### XOOJINTA BARNAAMIJYADA IYO KA JAWAABIDA MUHIIMKA U AH JINSIGA

- **BC** Xaqiiji in qoondaynta miisaaniyada barnaamijyadu ay ku xiran yahay shardiga miisaaniyad xagga jinsiga loo eego oo lagu qiimeeyay falanqaynta billowga ah lana kormeero billowga ilaa fulinta mashruuca.
- **BC** Qorshee oo fuli mashaariicda ay ku lug leeyihiin wakiillada oday dhaqameedka iyo culimada si ay u xoojiyaan taageerada bulshada si loo ilaaliyo loogana hortago xadgudubka galmada.
- **BC** Gurmadka bini'aadantinimada oo la sii wado si loo xaqiijiyo hoos u dhigida halista rabshadaha jinsiga ku salaysan iyadoo laga dhigo mid guud ahaan wax looga qabto dhammaan heerarka gurmadka.

### KOR U QAADIDDA TAAGEERADA DHIBANAYAASHA

- **DFS DXF** Xaqiiji in wadiiqooyinka isku-gudbinta ee dalka oo dhan ay u shaqeeyaan si hufan oo waxtar leh.
- **DFS DXF** Xaqiiji in xarumaha hal meel adeegyada ku bixiya laga sameeyo lagana hawlgeliyo dhammaan Dowladaha Federaalka Xubnaha ka ah oo dib loo furo xarunta dumarka ee hub ka dhigista, ciidan ka saarista, iyo dib u dhexgalka bulshada oo loogu talagalay haweenka horey loola xiriirin jiray Al-Shabaab ee Muqdisho.
- **DFS DXF** In la aqoonsado baahiyaha gaarka ah ee hooyooyinka iyo carruurtooda ka dhasha kufsiga iyo xadgudubka galmada ee colaadda, lana siiyo ilaalin iyo xuquuq.
- **BC** Si ay adeeg bixiyayaashu u ballaariyaan dhulka juqraafi ahaan ay gaaraan iyo tayada adeegyada gaarka ah ee GBV, oo ay ku jiraan maaraynta kiisaska iyo taageerada nafsiga ah.
- **BC** Samee taageero iskudubaridan, dhinacyo badan leh oo la siiyo dhibanayaasha iyo carruurta ka dhalatay kufsiga colaadaha la xiriira, gaar ahaan iyadoo loo marayo shabakada ka dhanka ah Rabshadaha Galmada ee Colaadaha ee Qaramada Midoobay.

### XOOJINTA -QAAB-DHISMEEDKA SHARCI, SIYAASAD IYO HAY'ADEED

- **DFS DXF** Xaqiiji fulinta iyo dhamaystirka qodobada ku jira qorshe hawleedka qaranka ee ku saabsan joojinta xadgudubyada galmada ee colaadaha iyo khariidadda 2019 ee Caruurta colaaaha saameeyeen si wax looga qabto xadgudubyada galmada ee ay geystaan ciidamada amniga Soomaaliyeed.
- **DFS DXF** Xaqiiji in sharciga qaranka iyo dhaqamada la xiriira ka ilaalinta xadgudubyada galmada ay u hoggaansan yihiin halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha.
- **DFS DXF** Xaqiiji in baaritaanno degdeg ah, dhibbanuhu udub dhexaad u yahay, madax bannaan, oo aan eex lahayn lagu sameeyo dhammaan xadgudubyada galmada iyo kuwa jinsiga ku saleysan iyadoo la xaqiijinayo in badbaadayaashu helaan caddaalad iyo magdhaw.
- **DFS DXF** Xaqiiji in xal degdeg ah oo waara loo helo keenidda kiimikooyinka loogu baahan yahay shaybaarka sharciga ee Garoowe si uu u sameeyo baarista DNA-ga lana xaqiijiyo in la soo bandhigo hanaan sharci oo DNA u gaar ah iyo dhisidda tayada shaqaalaha garsoorka ku lug leh ururinta, ilaalinta iyo qaadista muunadaha DNA-da.
- **DFS DXF** Xaqiiji dhisidda Unugyada Ilaalinta Haweenka iyo Carruurta ee Booliska Qaranka Soomaaliyeed ee Maamulka Gobolka Banaadir iyo dhammaan dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka.
- **DFS DXF** Qoondee, deji oo kormeer miisaaniyado si gaar ah ugu heellan dhinaca jinsiga oo tixgelin siinaya baahiyaha kala duwan ee ay kala leeyihiin ragga, dumarka, wiilasha iyo gabdhaha.
- **BC** Taageer Dowladda Federaalka Soomaaliya si ay u dejiso sharci u hoggaansama halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha si loo xoojiyo in dadka oo dhan laga ilaaliyo xadgudubka galmada.